

217 156 My Journey to Success (Safarkaygii Guusha)

TOTAL DURATION: 00:14:47

Time in	Time out	Transcription	Translation
00:00:15	00:01:24	Abdikadir: Kusoo dhawaada barnaamijka ku hadal luuqadayda kaasoo dadka ka kala yimid bulshooyinka dhaqamada kala duwan ay uga hadlaan sidii loola noolaan lahaa baahiyaha gaarka ah si fiican, magacayga waa Cabdi waxaan la shaqeeya hay'adda ECCV Victoria. Wareysyada aan qaadno, waxaan wax ka baranaa dadka baahiyaha gaarka ah la nool, oo ka kala yimid dhaqamada bulshooyinka kala duwan. Sida ay u isticmaalaan khibradooda shaqsiga ah iyo midda bulshada si ay ula noolaadaan baahiyahaas meel kasta oo ay joogaan. Waxaan soo bandhignaa sheekooyinka xaqiiqda ah, farsamooyinka, fikradaha, ay nala wadaagaan dadka baahiyaha gaarka qabo, iyo bulshada kale. Kuwaasoo nooga sheekeynayo sidii lagu gaari lahaa, meelaha laga helo fursadaha shaqo, waxbarasho, isdhexgalka bulshada iyo wixii la mid ah. Maanta waxaa marti inoo ah Aisha, oo inooga sheekeyn doonta, sheekadeeda ku saabsan safarkeeda guusha. Soo dhawoow Aisha, waad ku mahadsan tahay inaad halkaan nala joogto.	Abdikadir: Welcome to the Speak My Language Program where the people that come from different cultures talk about how to live well with the different needs. My name is Abdi and I work with ECCV Victoria. Through the interviews we conduct, we learn about people living with special needs, who come from different cultures and communities. How they use their personal and social experiences in order to live with those needs wherever they are. We present real stories, techniques, ideas, shared with us by people with special needs, and other communities. Which tells us how to achieve, where to find opportunities for work, education, social interaction and so on. Today we have Aisha as our guest, who will tell us her story about her journey to success. Welcome Aisha, thank you for being here with us.
00:01:24	00:01:26	Aisha: Haa walaal waa dhawahay.	Aisha: Thank you for having me.
00:01:27	00:01:36	Abdikadir: Su'aasha Koobaad. Maadaama aad wax badan ku qabsatay muddo kooban, manoo sheegi kartaa sida uu ku bilowday safarkaagii guusha?	Abdikadir: First question. Since you have achieved so much in such a short period of time, how did you start your journey to success?
00:01:36	00:02:34	Aisha: Walaal, waad mahadsan tahay, waxa ii suurto geliyay inaan wax badan qabsado oo aan heerkan gaaro Ilaahay ka sokow iyo caawinta waalidkay waxbarashada. Waligay waxaan ahaa qof waxbarashada jecel ilaa markaan yaraa aad baan waxbarashada u jeclaa. Luqada Soomaaliga waxaan bartay anoo yar, oo shan ilaa lix sano jira ayaa la i baray. Ka bacdina Waxaan bilaabay inaan bugaagta akhriyo, gaar ahaan buugaagta suugaanta ah. Waxaan aad u jeclaa markaan yaraa inaan Wariye noqdo, ama Abukaate aan noqdo, Looyar waxa loo yaqaano. markaan weynaaday labadiiba waan iska daayay, sababo jira awgood. Runtii, markii la weynaado waa la is	Aisha: Brother, thank you, the thing which has enabled me to do a lot and reach this level, besides God and the help of my parents, is education. I have always loved education since I was very young. I learned the Somali language when I was young, and I was taught it when I was five to six years old. Then I started reading books, especially literary books. When I was young, I wanted to be a journalist or a lawyer. When I got older, I gave up both, for some reason. Actually, when you grow up you change but I am now back to studying to become a lawyer.

		badalayaa, laakiin waxaan dib ugu noqday oo hada aan waxbarashadiisii ku guda jiraa Abukaatanimada ama Looyanimada.	
00:02:36	00:02:40	Abdikadir: ma noo sheegi kartaa waddada aada ku gaartay qeybaha sare ee waxbarashada?	Abdikadir: Can you tell us the path you took in attaining the higher level of education?
00:02:40	00:04:04	Aisha: Walaal, waxaan ka bilaabay anigu markaan yaraa ma helin waxbarashada asaasiga ah, oo maadaama dagaaladii iyo wadankii wixii ka dhacay, dugsi hoose iyo dugsi sare midna ma helin waxbarashadoodii. Markaa markaan Australia imid waxaan ka bilaabay, luuqada Ingiriiska kow waa ka bilaabay iyo ABC, waxaan qaatay certifikateyo hoos-hoose, waxaan uga gudbay certifikayt 3, oo akaadhemik ahaa, muddo kooban ka baccina waxaan u gudbay certifikayt, liberal art la yiraahdo oo waagaas jiri jiray, maxaan ku dhahaayeey, markaan certifikaytkaa dhameeyayna, waxaa suurtagal ii ahayd inaan jaamacad aado. Laakiin si aan aqoontayda u kororsado, siiba luuqadda Ingiriiska, waxaan doortay inaan sameeyo diblooma, oo aan ka sameeyo koleej, la odhan jiray Centre for Adult Education Melbourne, oo aan u maleynayo ilaa hadda in Falembe Street uu ku yaalo, maadaama markaa aan dibloomadaas qaataynawaxaan ku guuleystay inaan jaamacada helo, oo sertifikatyadaas kala duwan, oo aan qaatay, ayaa ii suuragaliyay, inaan jaamacada helo, jaamacaddii markaas dareenkayga ahayd, in la iga aqbal.	Aisha: Brother, When I was young, I did not get basic education and because of the wars and what happened in the country, I did not attend neither primary school nor high school. So, when I came to Australia I started to learn the English language from the beginning of ABC. I took basic certificates then I went on to achieve certificate 3 which was academic. After a short period of time, I moved on to a certificate called liberal arts, which existed at that time and when I completed that certificate I was able to go to university. But in order to increase my knowledge, especially the English language, I chose to do a diploma and do that at a college called the Centre for Adult Education Melbourne, which I think until now is located at Falembe Street. And because I obtained that diploma, I managed to get into a university and obtained different certificates that made it possible for me to get into a university, and especially the university I was hoping to be offered.
00:04:05	00:04:17	Abdikadir: Sidee ayaad dareentay maalintii kuugu horeysay, ee fasalka jaamacada aad xaadirto, ma faraxsaneyd mise cabsi ayaa dareemeysay?	Abdikadir: How did you feel on your first day at university? were you happy or scared?
00:04:20	00:05:00	Aisha: Runtii aad baan u faraxsanaa, waayo, maadaama aan marwalba waxbarashada jeclaa, aad waxaan ugu faraxsanaa inaan, goolkaygii aadka u dheeraa oo ah inaan jaamacad galo, maxaan ku dhahaayeey ayaan ku guuleystay markaa waxaan xaadiray oo aan tagay orientation week, wiiga la yidhaahdo oo ka horeeya wiiga waxbarashada jaamacada, si aan u soo helo macluumaadka aan u baahnaa iyo, dadka baahiyaha gaarka qabo sida loo caawiyo, iyo	Aisha: I was really happy because I have always loved learning. I was very happy that my long-term goal of going to university was achieved. So, I attended and went to the orientation week, which is the week before classes start at the university, in order to get the information I needed and find out how people with special needs are helped, meet the teachers, see the classes, see the library I would study in. Therefore, it was a very important time of my life.

		macallimiintii aan la kulmo, fasaladii iyo tiyaataradii aan wax ku baran lahaa, iyo libreerigii, si aan usoo kala arko markaa waxay ii ahayd wakhti aad muhiim iigu ah noloshayda.	
00:05:03	00:05:11	Abdikadir: Mala kulantay wax caqabad ah ama dhibaato ah, marka aad gaadiidka dadweynaha raacayso si aad u gaarto goobaha waxbarashada?	Abdikadir: Did you encounter any obstacles or problems while using public transport to reach to the educational institutions?
00:05:12	00:05:58	Aisha: Runtii bilowgii, caqabado badan waa la kulmay oo kala duwan, maadaama, qof laba birood ku socoto aan ahaa, maxaan ku dhahaahayeeey, meelaha isteeshinada basaska laga raaco iyo taraamyada lambaradooda iyo, maxaan ku dhahaayeeey, baskii oo iga tagaya marar badan oo aanan ka gaaraynin, maadaama aanan ordi karin, caqabadahaas oo dhan waa la kulmay, laakiin, maxaan ku dhahaayeeey, waan la qabsaday markii dambe, ilaa hadda waxaan isticmaalaa public transport ama gaadiidka dadwaynaha, oo markii horena aan jaamacadaha ku aadi jiray, iyo kollejiyadii ka horeeyeyba, ilaa hadana aan shaqada ku aadaa. markaa, Alhamdulillah, wixii aan lasoo marayba hada waxa weeya waan la qabsaday.	Aisha: Actually, at the beginning I faced many different obstacles since I was using crutches, at bus stops and figuring out the right tram number as well as missing out on buses often because I could not get there on time. I faced all these obstacles but I got used to it. Even right now I use public transport which is what I have been using in the past to get to university and colleges before that. So thanks to God whatever obstacles I faced in the past is now behind me.
00:06:05	00:06:32	Abdikadir: Marka aad timaado goobaha waxbarshada, sida jaamacadda, ama koleejka, ma u baahnayd wax hagaajin ama qaabeyn ah, waxay dhahaan adjustment, sidaa matalan lifti la raaco, kursi macnaha fadhigiisu munaasib kuu yahay, haddii ay jawaabtaadu tahay, haa, oo baahiyahaa aad qabtay, ma heshay oo available makuu ahaayeen, maaragtay, waxyaalahaas, adjustmentiga ah?	Abdikadir: When you come to a place of learning such as a university or college, did you need any adjustment like when using an elevator, a chair that is suitable for you? and if your answer is, yes, did you get help for those things and was help available for you in order to adjust to those things?
00:06:35	00:08:39	Aisha: Haa, walaalooow, baahiyo badan waa jireen, waa u baahnaa liftiyo tashiilaad ah, tiyaatarka uu yahay building, high rise ah oo u baahan, ku dhahay gaari waa u baahnaamaxaan ku dhahaayeeey, tashiilaad ii sahla inaan u kala socdo jaamacada, maadaama jaamacadu, xad aad u ballaaran ay leedahay oo maragtay tiyaataradu ay kala fog fog yihiin, oo qof laba birood ku socda, aanay u fududeeyn, inuu inta tiyaatarka tago, tiyaatar kaloo 10 minute, ama 5 minute loo soconayo, uu tago semesterka koobaad waa igu yara adkayd xaaladdu, laakiin markii	Aisha: Yes, brother, there were many things I needed help with. I needed help with elevators, the lecture room was in a high rise building, I needed help with cars, help finding out information about the university, because the university was too far away from me and the theatres are far apart, and it is not easy for a person walking on crutches to go to the theatre. Getting to the lecture rooms was 10 minutes walk or 5 minutes walk and things were difficult for me during the first semester. However, things eased up a bit after a while because I connected with

		<p>danbe wax walba ay fududaadeen waxaan xiriir la sameeyey, disability services ama ardayda baahiyaha gaarka ah qaba, serfisyo loogu talagalay oo caawiya, rutina aad bay ii caawiyeen oo waxay i siiyeen gaari yar oo dadka, baahiyaha gaarka ah qabaa ay ku socdaan oo elektarik ah. Gaarigaas yarka ah, markaa wuxuu ii suuragaliyay inaan, calashaan aanan daahin oo tiyaataradii aan u baahnaa aan tago, markaan library u baahanahay inaan tago, markaan rabo inaan cuno qadoo kale soo gato, la-aantiisba waxay ila tahay inaan, maxaan ku dhahaayeey igu adkaan lahayd, caqabadaha kaloon la kulmay waxaa ka mid ah, mararka qaarkood in laga dhigi jiray tiyaatarka waxbarashada, meel jaajar loo fuulo kale, laakiin markaan la hadlo oo aan codsado oo aan la hadlo macallimiinta, waxay suurta galisay oo ii suurta gashay marar badan in la baddalo, oo laga dhigo theater accessible ah, oo aan gaariga la geli karo. Markaa sidaasay ahayd, wixii aan u baahnaayoo dhan, badankiis, tashiilaadkiisii waan helay, wayna ii fududaysay inaan waxbarashadeeda sii wato.</p>	<p>services that assist people with disability. These services helped me by providing me with a special electric wheelchair that made mobility easier for me. The wheelchair made it possible for me to not get late to the lecture rooms, go to the library when I needed to go to the library, buy lunch when I needed to buy lunch. Without the electric wheelchair things would have been much more difficult for me. The other obstacle I faced was that some of the lecture theatres had stairs but after speaking with my teachers about the difficulty with the stairs they built wheelchair ramps. Most of the things that I needed help with I was able to get that help and that made it easier for me to continue my studies.</p>
00:08:40	00:08:43	<p>Abdikadir: ma noo sheegi kartaa waxbarashada heerka aada ka gaartay?</p>	<p>Abdikadir: Can you tell us about your level of education?</p>
00:08:44	00:09:23	<p>Aisha: Haa walaal, heerka koowaad, ee digriiga loo yaqaano ayaan dhameeyay, waxaan qaatay bachelor-ka loo yaqaano arts ama social science. Kabacdina waxaan uga gudbay heerka labaad oo masters ah oo ilaa hadda aan dhigto oo waxaan isku sameeyaa laba masters oo midna uu law yahay ama abukaate uu yahay, midna uu social science yahay, ilaa hadana waa wadaa, oo calashaan waa ii socdaa.</p>	<p>Aisha: First stage, I completed a bachelors degree of Arts and Social Science. After that I went on to do my masters degree and I am still doing it right now. I am actually doing to Masters degree. One of those is in the field of Law while the other one is Social Science, and I still continuing, I meant I am still continuing.</p>
00:09:27	00:09:40	<p>Abdikadir: shahaadooyinka waxbarasho, makuu suurta geliyeen fursado shaqooyin, haddii jawaabtu tahay haa, ma noo sheegi kartaa hay'adaha aad, kasoo shaqeysay iyo kuwa hadda aada ka shaqeyso, iyo doorkaaga shaqo?</p>	<p>Abdikadir: Did your educational qualifications lead to job opportunities? If the answer is yes, can you tell us about the organizations you have worked for and the ones you currently work for, and your role of the role?</p>
00:09:41	00:11:23	<p>Aisha: Haa walaal, simistarkii u danbeeyay markaan ku jiray, waxa ii suurta gashay inaan helo intership ama waxbarasho shaqo, xafiiskii intership-ka i siiyay baan markii danbe shaqo ka helay oo shaqo i siiyay oo ahaa, dhibaarmantiga loo</p>	<p>Aisha: I was able to get an internship in the last semester. The office that gave me the internship gave me a job. This was at the Department of Cabinet or as it is known for DBC. I used to work as a Project Officer or Policy Officer. I used to work at an</p>

		<p>yaqaano DBC ama Department of Cabinet. Waxaan u shaqeyn jiray as a Project Officer ama Policy Officer, waxaan la shaqayn jiray dhibaarmantigaas xafiis ka mid ah, mudo dhawr sano ah ayaan joogaay meeshaas, ka bacdii waxaan uga gudbay dhibaarmantiga of Human and Health Services, intaan labada dhibaarmanti la kala qaybin, sidaad ogtahay waaba lakala qaybiyee, gaar ahaan xafiiska Wasiirka caafimaadka. Waxaan ka mid ahaa shaqaalaha COVID response ama cudurka COVID ka shaqeeya, oo dadka response gareeya oo kala haga, iimaylada usoo dhaca wasiirka caafimaadka, ayaan kala qaybin jiray, oo aan u kala diri jiray, tiimamka kala duwan ka bacdina waxaan hada uga gudbay, Dhibaarmanti cusub oo la yidhaahdo Families Fairness and Human Services. Waxaan ku noqday takhasuskaygii hore ama wixii hore, een markii horeba ku shaqeenayay, ee bolosiga ahaa, markaa hada halkaasaan ka shaqeeyaa.</p>	<p>office in that department for several years. Then I moved on to another department and that was the Department of Human and Health Services before it was made into two departments. As you may know, that department was split into two departments, especially the office of the Minister of Health. I was one of the staff working on the COVID response team, responding to the people that needed help. I used to handle e-mails that came to the Minister of Health by directing those emails to the appropriate teams. I then went on to work at the Department of Fairness and Human Services. I went back to my previous specialty which I already worked in which was the policy so now I work there.</p>
00:11:23	00:11:59	<p>Abdikadir: waa mahadsan tahay. Waxaan soo gaarnay dhamaadka waqtigii wareyiga maanta waxaan, rabaa inaan u mahad celiyo caasho inay halkaan nala joogto oo ay nala wadaagtay sheeko ku saabsaneyd, ku saabsanayd safarkeedii guusha, wax badan oo laga qaadan karo ayaa ku jira wixii ay nala wadaagtay. Aniga ahaan waxaan ka qaatay farriinta ah in qofka hadduu dadaalo, oo uu waxbarto in noloshiisa uu si fiican u noolaanayo. Caasha adigay ka waran maxay tahay fariintaada aada u dirayso, dadka baahiyaha gaarka qaba iyo dhammaan bulshada guud?</p>	<p>Abdikadir: Thank you. We have come to the end of today's interview. I want to thank Aisha for being here with us and sharing with us her journey of success. There are many things that can be learned from what she shared with us. For me, I took the message that if a person works hard and study their life will be well lived. What about you Aisha, what is your message to people with special needs and to the general public?</p>
00:12:01	00:13:35	<p>Aisha: Saad adiguu sheegtay weeye markaa waxbarashadu, caawin badan bay leedahay, oo nolosha tashiilaad badan bay kuu samaynaysaa, kumana xirna, inaad baahiyo gaara qabto iyo inaanad qabin, waxqabadka caadiga ah calaashan able-ka ah ama caadiga ah, waxa ay sameeyaan oo dhan waan sameyn karnaa. Wadankana waxaa yaala fursado waxbarasho oo aad u fiican oo uu qofku meeshu rabo ku gaari karaa, wuxuu rabo ku qabsan karaa, marka waxaan dhihi lahaa, dadku inay inay wax bartaan oo weliba gaar ahaan luuqadda inay</p>	<p>Aisha: As you said, education is very helpful and makes life easier for you. It doesn't matter if you have special needs or not. We can do almost everything people who don't have disability can do. There are excellent educational opportunities in the country where a person can achieve and do whatever they put their mind into it. Therefore, what I would say to people is that they should study and especially learn the language and understand the country they live in so that their lives will be easier. Another thing I would say is, as Somalis say, whoever works hard will achieve.</p>

		<p>bartaan, oo wadanka ay ku nool yihiin ay fahmaan. Si noloshoodu u fududaato inay ku dadaalaan, waxaan dhihi lahaa, sida soomalidu dhahaan qofkii dadaalaa wuu gaaraa, markaa in caqabadaha lala kulmaana waa wax nolosha bini'aadamka ka mida markaa, in qofku maaragtay uu dadaalo, uu goolka big picture waxa la yidhaa, ama goolkiisa uu fiiriyo. Hadii la dadaalan waa la gaari doonaa marka waxbarashadu, sidaan dhahno waayee soomaliga oo ah, aqoon la'aani waa iftiin la'aan. Markaa waxaan dhihi lahaa, qof walba waxaan ku boorin lahaa da'du ma xirayso. Wixii kale oo caqabada ah, oo ay ka mid tahay, baahiyo gaara inaad qabtana, kuma hor istaageyso. Markaa, waxaan dhihi lahaa qof waliba inuu dadaalo, oo uusan quusanin, marwalba uu isku dayo, inuu waxbarto.</p>	<p>Facing challenges is a part of human life but it is important to strive hard and see the bigger picture by focusing on the goals. If you work hard, you will be able to achieve your goals. Education, as we say in Somalia, lack of knowledge is lack of light. I would urge everyone that age is not a barrier. Any other obstacles such as special needs that you have will not prevent you from achieving your target. So, I would say that everyone should strive and not give up. Always try to study hard.</p>
00:13:36	00:14:38	<p>Abdikadir: haddii aada ka heshay duubisteena. Fadlan Fiiri websitekeena, speakmylanguage.com.au. Kaas oo aad ka heli karto wax badan. Fadlan u sheeg dadka kale barnaamijkaan. Sidoo kale nagala soco aaladaha xiriirka bulshada, sida Facebook, Twitter-ka, Instagram-ka iyo LinkedIn. Nagu caawi inaan gaarsiino sheekooyinka ku saabsan barnaamijkan Australia, iyo waliba adduunka oo dhan. Hay'adda ECCV Victoria waxay ku faraxsantahay inay idiinsoo gudbiso, barnaamijka ku hadal luuqadayda. Barnaamijka ku hadal luuqadayda waxaa maalgaliyay Waaxda Adeega Bulshada, waxaana la gaarsiiyey Australia oo dhan ayadoo ay iska kaashanayaan, dhammaan gobollada, ay ku nool yihiin bulshooyinka dhaqamada kala duwan. Warbaahinta qaranka ee nagala qayb qaadanaysa barnaamijkan waa SBS iyo, NEMBC.</p>	<p>Abdikadir: If you enjoyed our recording. Please check out our website, speakmylanguage.com.au. Which you can get a lot of information from. Please tell others about this program. You can also follow us on social media platforms such as Facebook, Twitter, Instagram and LinkedIn. Help us spread the word about this program in Australia, and around the world. ECCV Victoria is pleased to present the "Speak My Language programme". The Speak My Language program was funded by the Department of Social Services, and was delivered throughout Australia with the cooperation of all regions where multicultural communities live. The national media that participates in this program are SBS and NEMBC.</p>